# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:03 AM** **Hansard No.21/4** **Kal-fadhiga 21aad fadhigii 7aad**

***04/05/2013***

**Md. Baashe Maxamed Faarax Gudoomiyaha: -** *Waxaa Fadhigan inoo Marti ah Hanti-dhowraha Guud ee Qaranka sidii aynu ku balansanayn si uu warbixin inooga siiyo Xisaab xidhkii 2010 iyo 2011, Marka waxaan ku soo dhoweynayaa Hantidhowraha Guud, Mudane Maxamud ku soo dhowow.*

**Md. Maxamuud Dheere:- Hanti-dhowraha Guud ee Qaranka:-**

***14 minute and 34 sec***. Waxaa farxad weyn noo ah inaan Golaha hornimaadno si aan Warbixin idiinka siino Xisaab xidhkii Miisaanyada Dawlada Dhexe ee Sanadihii 2010-11, hore waxaan idiinku soo gudbiney oo halkan ka akhrinay Xisaab xidhadii Miisaaniaydaha Sanadihii 2008-9, ilaahay mahadii waxaa noo farxadweyn ah inaan halkan maantana ka akhrinayo Xisaab Xidhadii labadaa sano, anagoo faah-faahin idiinka siinayna, hadaan ku horeeyo.

***Xisaab Xidhkii Miisaaniayda Sanadkii 2010:-*** waxaa laga doonayay Miisaaniaydii ku talagalka ahayd ee aad halkan ka ansixiseen iyadoo ahayd odoros (estimated Budget), iminkana iyadoo la isticmaaylay oo noqote Miisaaniyada dhab ah (Actual Budget) mar labaad Golaha hortimi, waxayna ka koobantahay laba qeybood Miisaniyada Caadiga ah iyo Mid ka baxsan Miisaaniaya Caadiga ah oo la yidhaahdo xisaabaadka Miisaaniyada ka baxsan (Extra Account Budget), sanadka 2010ka Miisaaniyada Golaha Wakiiladu Ansixiyay ee ku talagalka ah waxay ahayd ***310,259,111,704 sl/sh.***

Dhakhliga dhabta ah ee soo xerooday sanadkaa wuxuu ahaa ***330,909,580,327 sl/sh,*** Markaa Dakhliga soo xerooday wuxuu ka badanyahay Dakhligii ku talagalka ahaa ee Goluhu Ansixiyay ee Miisaaniyada ku gudbiyay Sanadkaa ***20,650,468,923 sl/sh,*** dakhligaasi waa cashuuraadkii ka soo xerooday Sanadkaa Miisaaniyadii ku talagalka ahayd, Cashuuraha sanadkaa aad ku ansixiseen Guud ahaan marka la soo koobo 4 nooc bay ahayd buugaagtey idiinku qoran yihiin oo waxay kala ahaayeen.

- Cashurta isticmaal
- Cashuurta Dakhliga
- Cashuurta Alaabta Hawsha
- Cashuurta wax soo saarka

- Iyo Dakhliga Hantida Dawlada

Boggag danbena iyagoo faahfaasan iyo waxay sii kala yihiin bay ku qoranyihiin halkan shaxda, sidaan ku socono waxaa ku qoran nooca cashuurta aad sanadkaa dakhliga ku ogolaateen sidaad arkeysaan waxaa muuqata isku celcelis intay noqdey ee kordhay ama is-dhintey, kharashka Miisaaniayda sanadka 2010ka ee sidii Goluhu ku ansixiyay waxay ahayd ***310,259,111,704 sl/sh,*** kharashak Dhabta ah ee Miisaniyadaas ee baxay wuxuu noqdey (actual expenditure) wuxuu dhanyahay ***262, 097,735,632 sl/sh***. 2010kii Dakhliga kula talgalkii ah wuxuu kordhay kharashkiina ku talagalkii hoos buu uga dhacay wuxuuna hoos uga dhacay ***84,197,796,072 sl/sh.***

Madaxyada Dakhligoodu kordhay waxay kala ahaayeen sida buugiina aan idiin soo daabacnay ku qoran oo ku xusanyahay, kharashka guud ee aan soo sheegnay ee sanadkaa 2010 guud ahaan wuxuu ka koobnaa kharashka Shaqaalaha, Kharashak Hawsha socota, kharashka qalabka hawsha, Kharashka raagtey ee daryeelka iyo dib u dhiska, Miisaaniyada la ansixiyay marka ay hawlgasho waxaa yimaada in madaxyada qaarkood lakala wareejiyo oo qaar la dhimo qaarna wax lagu kordhiyo.

2010 waxaa la wereejiyay lacag dhan ***4,106,620,596 sl/sh,*** 70 kala wareejinood baa dhacay midkasta halka laga weerjiyay iyo meesha lagu wareejiyay halkaas ayay ku qoran tahay, markaa Odoroska Miisaaniyadii Sanadka 2010 sidaasay noqotey.

Xisaabaadka ka baxsan ee la yidhaahdo Extra Budget ama extra Account hadaan u galno waxa ka koobanyihiin 5 nooc oo xisaabaadkaas ah kalana ah:-

- Horumarin (advance Account) lacago la sii horumariyay.
- Curaaraha (Deposit Account)
- (lacagaha aanay dawlada lahayn oo soo gasha dawlada).
- Bitty Cash
- iyo Xawaaladaha

markaa 5 nooca siday ahaayeen xisaabtooda Buuga ayay idiinku cadyihiin.Isu dheelitirka kharashak iyo dakhliga waa kan buuga isna ku faahfaahsan, Cashuuraha siday ahaayeen iyo waxa ka soo xaroodey xaga dambe ee buugaagta aad haysaan,

Xisaab xidhkii Miisanayada Sanadka 2010 markaan isku soo xoodhiyo sida Buugaagta aan idiinku soo gudbinay waa sidaa Waxaad ka arki doontaan

Xisaab xidhka lacagaha Wareegaya ee u soo wareegaya Sanadka 2011ka ee hadhaanaya ee saamaynaya isla sanadka dambe.

***Xisaab Xidhka Miisaaniyada Sanadkii 2011ka:-*** kula talagalka Miisaaniyada Sanadka 2011ka ee Goluhu ansixiyay dakhligeedu Wuxuu ahaa ***529,935,322,246 sl/sh,*** dakhliga dhabta (actual Revenue) ah ee soo xerooday sanadkaas wuxuu noqdey ***481.323,687,473 sl/sh,*** dakhliga Madaxyadaha qaarkood hoos u dhac baa ku yimi, qaarna kor u kac baa ku yimi sidaad ku arki doontaa shaxda Buuga ku qoran ee qoraalkaa ka hooseysa, Cashuuraha midkasta intii ka soo xerooday iyo isbadalada ku yimiba halkaas bay ku faah-faahsanyihiin.

Kharashka ku meel gaadhka (budget estimate) ah ee Miisaniyadii Sanadka 2011ka wuxuu ahaa **529,335,322,246 sl/sh,** kharashku siduu u kala baxay waa tan ku qoran shaxda Boga 4aad ee Buuga Xisaab Xidhka Miisaaniyada sanadka 2011ka, oo kala ahaa Kharashka Shaqaalaha, Kharashka Hawsha Socota, Kharashka Hantida Raagtey, kharashka Qalabka Hawsha, kharashka ku-Daryeelka iyo Dib–udhiska iyo Kharashka Dhismayaasha iyo kaalmooyinka Guud,

Sanadka 2011 waxaa la sameeyay kala-wareejimo Lacagtoodu dhantahay ***9,459, 302,801 sl/sh,*** kala-wareejinadaa oo ah sidaan marka meel kharash looga baahdo oo meel kale looga soo raro sida sharciguba fasirayo.

Xisaabaadka ka baxsan Miisaaniyada ee (Extra Budget Account) sidaan hore u soo sheegnay Wasarada walba waxay leedahay Xisaabo ka baxsan Miisaniyada, Sanadka 2011ka lacagaha Miisaaniyada ka baxsan 4 nooc bay ahaayeen kuwaas oo Madaxyadoodu kala cadyihiin sidii Goluhu ku ansixiyay mid walba wixii ku talagalkeedu wixii actual ee baxay iyo Hadhaaga soo hadhay.

Waxa intaa soo raaca waxa weeye isu-dheelitirka treasury and bank statement oo ah Dakhliga iyo Kharashka (Revenue and expenditure) ee Sanadka 2011 oo ah Muraayada muujinaysa ama dheelitiranyihiin waa kuwa Boga 5aad ku faah-faahsan iyagoo is-garabyaala isna xidhaya, Runtii waxaa Mar labaad noo farxada inaan Golaha horkeeno Xisaab xidhada 2daa sano sidaan halkan idiinku faah-faahiyay sidey u dhantahay wixii iska dhimay iyo wixii ka soo baxayna Buugaagta aan idiin soo gudbinay ay ku kala cadahay, soo dhoweyntiinana waad ku mahadsantihiin, intaas ayaan kaga baxay.

**Md. Maxamed Barkhad Miigane:-** Gudoomiye xisaab xidhku kaftan maaha, waa xuruuf, Jaanis baa awalba la isasiin jirey lagu soo akhriyo, Markaa waa in 1 Maalin oo aan kaga soo bogano.

**Md. C/raxman Muuse Jaamac:-** Gudoomiye Xisaab xidhadani waa 2 sano ee 2010 iyo 2011kii, markaa aynu nidhaahno Sanadkii 2012ka noo soo de-deji kuwan aynu sidaa ku ansixino.

**Md. Muuse Hoos ujeed:-** Gudoomiye anigu waxaan waafaqsanahay in la soo akhriyo loona doonto Miisaaniyadihii si loola soo eego, Markaa Wakhti aynu siino si Mudanayaashu hawshooda uga soo gutaan ka dibna aynu u yeedhno Hantii-dhowraha si wixii su'aalo laga qabo wax looga weydiiyo.

***Gudoomiyaha:-*** *waxa weeye in labada Buug la soo akhriyo intaa ka dibna wixii su'aalaha aynu ugu yeedhno Hantidhowraha, Iminkana waan fasaxaynaa hantidhowraha, waxaana laga codsanayaa hantidhowraha in Buugaagta 2010ka uu soo Kordhiyo, Fadhiguna Sidaas ayuu inoogu xidhanyahay, waadmahadasantihiin.*

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ---------------------------------------------------- | --------------------------------------------- |